



**Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad
Documentiga kal.3aad kul.9aad**

05/10/2013

Kalfadhiga 3-aad

Kulankiisa:9-aad, sac.fur,12:17gh, sac.xir,1:10gd.

Guntinta: 166 xildhibaan

Ajendaha:

- 1.Furitaanka Aayadaha Qu'ranka kariimka**
- 2.Ansixinta Ajendaha**
- 3.Hadal Jeedin Guddoomiyaha**
- 4.Qeybinta Hadal Qoraalka 1aad-7aad ee kalfadhiga 3-aad**
- 5.Warbixinta deeganada**
 - a) Sanaag (xil: Mahdi Cali Cumar)**
 - b) Sh/Dhexe (xil: C/laahi Axmed Coonka)**

Shir-Guddoonka, Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka Mudane: Muxamed Sheekh Cusman Jawaari.

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusman Jawaari, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'anka kariimka uuna Akhriyay **xil: Sheekh Shaacir**, Intaa ka dib Guddoomiyaha waxa uu soo jeediyay in la ansixiyo ajendaha Xildhibaanada wey ansixiyen, Guddoomiyaha ayaa xildhibaanada u soo jeediyay, warbixin ku saabsan shintiriska barnaamijka howlgalka Baarlamaanka sanadka 2013ka, kuna saab-san sidii loo guda gali lahaa Shaqooyinka Baarlamaanka horyaala, Guddoomiyaha ayaa xildhibaan-ada u soo jeediyay 20/10/2013,wixii taariikhdas ka dambeya in uu xildhibaan Golaha Baarlamaanka ka maqnaan Karin,lana tir-tirey fasaxyadii oo dhan, hadii ay dalka joogaan iyo hadii ay dibada jiraanba,waa in ay soo xaadiraan, Guddoomiyaha ayaa xildhibaanada u sheegey in ay kulan la yeelan doonan odayaasha dhaqanka.

Guddoomiyaha waxa kale uu sheegey taariikhda marka ay tahay 26/10/2013 ka, in uu Ra'isal Wasaaraha hor iman doono Golaha Baarlamaanka.

Guddoomiyaha waxa kale uu soo jeediyay, in Guddi walba uu ka qeyb Qaato warbixinta ku saabsan miisaaniyadda, ka dibna warbixinta ay u gudbiyan guddiga miisaaniyadda, waxa kale uu sheegey Guddoomiyaha Taariikhda marka ay tahay 14-15/11/2013ka, in miisaaniyadda la hor Keeno Golaha Baarlamaanka uuna imandoono Wasiirka Wasaarada Maaliyada, Intaa ka dib Guddoomiyaha waxa uu soo jeediyay in bisha Juun 15- keeda in la soo gaba-gabeyo, dhamaan hindise sharciyeed-ayada iyo dhismahooda iyo horumarintooda, waxaa kale oo aan dooney naa in aan is waa fajino maamulada Gobolada iyo Degmooyinka, maadama aad dhisteen, sharciyadii Gobolada iyo degmooyinka, waa in la aada Gobolada iyo degmooyinka.

Guddoomiyaha ayaa sheegey in uu xukuumada ka codsanayo, in ay la socodsiiso xaaladooda meesha ay mareyso.

- **Xil:Maxamed Cabdi Yuusuf:**Waxaan tacsii u dirayaa dhaman dadkii Soomaaliyeed eek u geeriyodey **Bada lampdusa** ee doonidii sarna.
- **Maxamed Cumar Dhalxa:**Waxaan u tacsii u dirayaa dadkii tahriiba-yaasha eek u dhintey bada gudaheeda **allah u naxaristo**, balse wax An ka hadlayaa xildhiban walal ken ah oo aan dhiman oo aan Nooleyn waa **Xil:Cumar Islow**, oo hada ku jira isbitalka dalka kenya

Oo la yiraahdo **Al-khan**, oo maalintii ku socota lacag aan aqliga

Galeyn, waxan soo jeedinayaa in ninkas wax loo qabto.

Guddoomiyaha ayaa u yeerey **Xil:mahdi Cali**: si uu Golaha ugu hor Akhriyo, warbixintii ku saab saneyd Gobolka Sanaag.

- **Xil:Mahdi Cali Cumar:**waxaa uu halkas ka soo jeediyay kormeer-kii iyo u kuur galidii xaalada gobolka sanaag, gobolada ay tagee-N waxa ka mid ah, dhahar, badhan, laas-qorey, safarkiisa waxa ugu muhiimsanaa in uu soo ogaado xaalada dhabta ah ee gobal-ka kajirta, inta uu kor meerka ku jirey waxa ay la kulmen, maamulka gobolka, odayaasha, aqoon yahanada, dhalin yarada, Haweenka, culuma'udinka, waxan halkas ku soo aragney baahi aad u weyn in ay jirto sida, waxbarashada, caafimadka, ceelasha, Beeraha, jidadka, xanaanada xoolaha, iyo nolasha aasaa-siga.

- **Xil:C/laahi Axmed Coonka:**Waxa uu halkas ka Akhriyay warbixi-Ntii iyo kormeerkii ay ku tageen Gobolka Shabelada Dhexe, ayagoo halkaas si diiran loogu soo dhaweeyay, kulano ay la qaat-een, maamulka Gobolka, salaadiinta,culu'ma udiinka,dhalinyara-da, wax garadka,haweenka, shacabka halkasi ku nool waxa ay soo gudbiyeen baahidooda sida, cisbitaalada, iskuulada, beeraha, jidadka,ceel-biyoodka, xoolihii oo dhibaateysan,in lala gaaro gurmada deg-deg ah ayay codsadeen.
- **Xil:Yaasiin Cabdi Seed:**Waxaan soo jeedinayaa shintiriskan in uu yahay midkii sadexaad oo loo qeybinayo xildhibaanada Mudane Guddoomiye waxbana kama hirgalaan, maalin walbo dib ayay u dhacayaan, waxan soo jeedinayaa in shintiriskan uu noqon ku wii hore oo kale,waxaa inoo yaala howlo badan, waa in xil leyska saara. Guddoomiyaha ayaa sheegey in leys cananto wey wanaagsan tahay, waayo shaqadana ayaa ku soconeysa.
- **Guddoomiyaha ayaa tacsii u direy dadkii soomaaliyed ee ku geer-iyooday inta u dhaxeysa liibiya iyo talyaniga(inaa lilaahi wa inaa ileyhi raajucuun).**
- **Shir-Guddoonka Guddoomiyaha Golaha Baarlamanka Mudane:- Muxamed Sheekh Cusman Jawari, uu shir Guddoominayay kal.3-aad kul.9-aad,uu sheegey in uu shirka xiran yahay saacada markey aheyd 1:10gd.**